Xafiiska Isuduwidda Waxbaritaanka Dadweynaha (**OSPI**)
Randy I. Dorn, Isuduwe Gobol

*Arday kasta diyaar u ah mihnad, kulliyad, iyo nolol*

# Qorshaynta tagidda kuliyadda?

## *Smarter Balanced iyo shaqada kooraska ee fasalka 12-aad way caawin karaan*

Hormuudka kulliyadaha siddeed gobol waxay aaminsan yihiin ardayda darajadoodu fiican tahay imtixaanada Smarter Balanced oo ku dadaalay koorsooyinka dugsiga sare oo dhan waxay gali doonaan kuliyadda iyagoo diyaar u ah inay guulaystaan. In kabadan 220 kuliyadood, jaamacado, iyo kuliyado bulsho iyo xirfadeed goboladani waxay oggol yihiin ardayga darjadoodu tahay 3 ama 4 imtixaanada Smarter Balanced inay si toos ah isku diiwaangaliyaan heerka galitaanka koorsooyinka deyn ku barashada marka la qaato.

***OGOW:*** *Dhammaan mac'hadada waxabarashada sare dawliga ah ee Washington way aqablayan darajoojinka Smarter Balanced sida lagu caddeeyay u diyaarsanaanta kuliyadda.*

## Sidee ayaan u isticmaali karaa Darajooyinkayga Smarter Balanced?

- Istimaal darajooyinka si ay kaaga caawiyaan doorashadaada korsooyinka Ingiriisida iyo xisaabta si aad u qaadato fasalka 12-aad si aad ugu diyaar garawdo nolol kadib dugsiga sare.
- Codso oo dabool shuruudaha galitaanka kuliyadda ama jaamacadda aad rabto. Haddii lagu aqabalay, oo dugsigaasi uu oggolyahay inuu aqbalo darajooyinka Smarter Balanced, darajo ah 3 ama 4 waxay kuu oggolaanaysaa inay kaa hor istaagto imtixaanid kale oo meelaynta ah iyo fasalo taageerid ah oo kharash ku baxayo. Waxa laga yaabaa inaad si toos ah u gasho heerka galitaanka koorsooyinka deyn ku barashada haddii aad isdiiwaangaliso sannadka aad ka qalin jabiso dugsiga sare.

  La xidhiidh si shaqsi ahaan ah kuliyadaha ama jaamacadaha si aad u raadiso nidaamkooda ay ku helayaan darajooyinka.

## Maxaa dhacaya haddii aanan helin darajada 3 ama 4?

Uma baahanid inaad hesho darajada 3 ama 4 si aad uga qalinjabiso dugsiga sare ama aad gasho kuliyad. Laakiin darajooyinka hoose waxay cadayn karaan in ay jiraan xoogaa xirfado iyo aqoon aad u baahantahay inaad qaadato kahor intaadan ka tagin dugsiga sare.

La shaqee macalimiintaada iyo la-taliyayaasha si loo xaqiijiyo gaababka oo loo sameeyo qorshe lagu dhisayo xirfadaada kahor intaad aadin kuliyadda.

"Biriijka-loo maro-Kuliyadda (Bridge-to-College)" koorsooyinka waa faslaka 12-aad koorooyin Ingiriisi iyo Xisaab ah oo loogu talogalay ardayda darajadooda intixaamada dugsiga sare ee Smarter Balanced ay tahay 2.

Ardayda kasbata "B" ama ku fiican koorsooyinka Biriijka xaq ayay u leeyihiin heerka galitaanka deyn ku dhigashada shaqda kooraska kuliyadaha bulshada iyo xirfadda.

**Baro in badan!**
**Smarter Balanced**
www.k12.wa.us/smarter

**Baro in badan!**
**Diyaar. Samee. Darajada.**
www.readysetgrad.org

**Baro in badan!**
**Meelaynta kooraska Kuliyadda**
bit.ly/SB-HigherEd
www.wsac.wa.gov/college-readiness

**Baro in badan!**
**Biriijka loo maro Koorsooyinka Kuliyadda (Bridge-to-College)**
bit.ly/BridgeToCollege

Si aad u daawato **fiidyow** sharxaya shaxdaan iyo sida ardaydu u isticmaali karaan buundooyinka Smarter Balanced iyo Qorshaha Dugsiga Sare iyo Kadib si ay u jeexaan jidkooda guulaysiga kadib dugsiga sare, booqo youtu.be/a-ynZFX0m9o.

READY WA

# ISTICMAALKA BUUNDOOYINKA SMARTER BALANCED SI AAD U JEEXDO JIDKAAGA

Hadda, kaliya 89 boqolkiiba dadka muddakarka Washington ayaa haysta dibloomada dugsiga sare ama wax u dhigma, 50 boqolkiiba wax ka yarna dadkan muddakarka ah waxay haystaan shahaado dugsi sare kadib ah. Marka la gaadho 2023, Gobolka Washington waxa yoolkiisu yahay in dhammaan dadka muddakarka ah ee gobolku inay haystaan dibloomada dugsiga sare iyo ugu yaraan 70 boqolkiiba dadka muddakarka ah inay haystaan shahaado dugsiga sare kadib ah.

Ku ridista ardayda dhabbaha guusha kadib dugsiga sare waa halka Heerarka Gobolka Common Core uu ka yimid. Waxay siiyaan tilmaamo cad oo waafaqsan waxa arday kastaa ay tahay inuu ka ogaado uuna awoodo inuu qabto xisaabta iyo farshaxannada luuqadda Ingiriisida laga bilaabo barbaarinta ilaa fasalka 12aad.

## SBA QIIMAYNTA SMARTER BALANCED

Nidaamka Qiimaynt Smarter Balanced, kaasi oo waafaqsan Heearka Gobolka Common Core ee cusub, wuxuu siiyaa jid si loo cabbiro horumarka ardayda ee heerarkan sannadka oo dhan loona sameeyo dib-u-habayn iyo wax-ka-qabadyo marka loo baahdo si loo caawiyo xaqiijinta ardaydu inay ku taagan yihiin dhabbaha guusha. Qiimaynaha waa la qaadaa fasallada 3 – 8 iyo 11.

## HS +BP QORSHAHADUGSIGA SARE IYO KADIB

Qorshaha Dugsiga Sare iyo Kadib wuxuu isku keenaa waalid-ka/wakiilada, barayaasha iyo ardayda si ay u soo saaraan dhabbaha gaarka ah ee arday kasta ee diyaar-u-ahaanshaha kuuliyadda iyo shaqada. Qorshuhu wuxuu iftiiminayaa hadaafka waxbarasho iyo shaqo, iyo koorsooyinka, imtixaanada, iyo waayo-aragnimada bulshada ama shaqada la xidhiidha ee daruuriga u ah si ay halkaa u gaadhaan. Dib ula eeg qorshaha qoyskaaga, macalimiintaada iyo tilmaamta la-taliyayaashaada dugsiga sare oo dhan si aad u hubiso inaad ku taagan tahay dhabbaha aad ku gaadhayso hadafkaada.

SBA Buundooyinkaaga **Qiimaynta Smarter Balanced** waxay ku dhici doonaan afar heer mid uun. Waxa aad heli doontaa buundada SBA xisaabta iyo buundo SBA oo kale Ingiriisida. Haddii aad keento 1-2, ama 3-4 midkuu doonaba, waxa jira dhabbe guulaysi

1 2 3 4

## MA GARATAY!

**Waxa aad leedaha ikhtiyaaro badan kadib dugsiga sare,** laakiin shaqo adag iyo caawimo dheeraad ah ayaaloo baahan yahay si aad halkaas u gaadho.

1 2

**Dareenkaagu ha soojeedo!**
La kulan la-taliyayaashaada oo hubi inaad shiishka saarto meelaha horumarka u baahan.

**Caawimo codso!**
Ka hubi macalimiintaada, la-taliyayaashaada iyo/ama waalidiinta caawimo dheeraad ah.

**Naftaada loolan gali!**
Qaado koorsooyin ad-adag.

FASLKA 8AAD SBA

HS +BP

Kadib marka aad hesho buundooyinkaaga SBA Ingiriisida iyo xisaabta, kala shaqee waalidiintaa/wakiiladaa, la-taliyayaashaada iyo macalimiinta soosaarista **Qorshe Dugsiga Sare iyo Kadib** si aad u caawisaan yeelashada hadaf sannadahaada dugsiga sare.

FASALKA 9AAD

**Ka hubisi** joogto ah macalimiintaada, waalidiintaa, iyo la-taliyayaashaada si aad u hubiso inaad ku taagan tahay qorshahaaga.

FASALKA 10AAD

Hubinta HS+BP

## TAN WAAD SAMAYN KARTAA!

**Waad aadi KARTAA kuuliyad**
laakiin waxay u baahan tahay dareen siin, go'aan iyo caawimo dheeraad ah si aad halkaas u gaadho.

1 2

FASALKA 11AAD SBA

**Koorsooyinka kala-guurka**
Siiniyeerada dugsiga sare ee u baahan caawimo dheeraad ah si ay ugu diyaargaroobaan galista iyo guulaysiga kuuliyadda, kooxo macalimiin ah iyo shaqaalaha kuuliyadda ayaa soosaaraya oo bixinaya koorsooyin kala-guur.

FASALKA 12AAD

Hubinta HS+BP

QALINJABIN
**Hambalyo!**
Waxa aad ka qalinjabisay dugsiga sare adiga oo leh xirfadaha guulaysiga dhabbe kasta oo aad doorato!

Shaqo-baradka

Jaamicad ama Kuuliyad

Farsamada Xirfadeed Barnaamijka

Milatariga

3 4

## SHAQO FIICAN!

**Waxa aad ku taagan tahay dhabbaha isku diyaarinta kuuliyadda iyo shaqada!**

**Joogtee jadwal adag oo haddana la maarayn karo.**

**Ku ilaali waalidiintaa/ wakiiladaa xayndaabka.**

**Hore u sii qorshee!**
Raadi fasallada adaygga badan ee aad qaadan karto iyo sidoo kale kuwa bixinaya buundada kuuliyadda.

3 4

## SII WAD!

**Waxa aad ku sugan tahay bartilmaameedka inaad kuuliyad gasho – iyo shaqo isku diyaarin marka aad gaadho fasalka 12aad.**

**Lacag dhaqalayso!**
$$$ Kasbo buundada kuuliyadda oo yaree kharashka adiga oo u maraya Running Start, Advanced Placement, ama ikhtiyaarada kale labada-buundo.

## KHAYRAADKA

**Ready Washington:** www.readywa.org

**Shuruudaha Qalinjabinta:** www.sbe.wa.gov/graduation.php

**Diyaar. Set. Websaytka qorshaynta macaamilka ee qalinjabinta:** www.readysetgrad.org

Maalgalinta shaqadaan waxa bixiyaha qayb ahaan Horumarinta Barashada Ardayga ee fursadda deeqda Qiyaasta: **www.wsac.wa.gov/isls-group**